

*English miyaad kuhadlin? Dhib male. Waxaa kucaawinaaya ururada hoos kuxusan.*

### ***Xarunta Dumarka iyo qoysaska (Center for Women and Families)***

*Xarunta wexey leedahay barnaamiyada kufsi iyo domestic violence. Waxaan lashaqeynaa jinsiyada oo dhan oo loogeystay kufsi mise dv oo kunool nawaaxiga Jefferson iyo sideed gobol oo kuhareereysan.*

*Adeeg yada aan bixino oo dhan waa bilaash iyo confidential? Adeegyada wexey kala yihiin, diyaarinta nabadgaliyada, iskaashi kooxeed, magan galin guryeed oo dag dag ah, adeeg walk-in? barida kahortaga, latalinta, caawinaad xaga sharciyada iyo caafimaadka, iyo kuhagida goobaha kaladuwan oo faah faahinta iyo adeegyada kale. Waxaan leenahay khadka telephonka ([502.581.7222](tel:502.581.7222)) oo furan 24ta saacadood oona leh turjubaan.*

### ***Hayada Qaxootiga oo Kentucky (Kentucky Refugee Ministries)***

*Barnaamij uadeego dadka Englishka kuyaryahay oo la dhibaateeyey oona kunool United States. Dibaatooyinka kala eh, dv?, xadgudub jinsiyeed, xadgudub dhaqaaleed, jirdil, harassment?, dhac iyo dhibaatooyin kale.*

*Sharci qofka kujoogo wadanka iyo caawinaada iskumaxirno. Turjubaanka qofka laga caawiyo waa bilaash. Manaloo baahno in aad ciidamada boliska laxariirtid sifa aad uheshid adeegyadan.*

*Adeeg yadoo kala ah, guuritaanka, ogeysiin xaga courts? raacista courtka? gudbin oo luguu gudbiyo sharciyahan, caafimaad jirka mise dhimirka, xeer ilaaliyeyaasha, buuxsashada caawinaad yada kaladuwan oo lasiiyo bulshada, caawinaad shaqa raadin, la dhaqanka milkiilaha guryaha, iyo caawinta adeegyada asaasiga sida voucherka? dharka mise cuntada.*

*Hadii aad tixgalineysid adeegyada kor kuxusan fadlan qoraal codsi ah kusoodir ([502-762-7020](tel:502-762-7020)). Fadlan qoraalka kudar magacaada iyo luugadaada.*